

SIDA LOO CODEEYO

 **VOTE**
2024

Codka aad bixinaysaa waa codkaaga—isdiiwaangeli, war hel, soco oo coday!

YAA CODAYN KARA?

Si aad Minnesota uga codayso, waa in aad tahay muwaadin Maraykan ah, ugu yaraan jira 18 sano Maalinta Doorashada, aadna deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

Haddii lagugu xukumay dembi culus, waad codayn kartaa haddii aadan hadda u xirnayn dembiga culus.

Waad codayn kartaa adigoo wali hoos jooga/kaa mas'uul yahay, haddii aan garsoore kaala noqon xaqla aad u leedahay codbixinta.

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Waa in aad ka diiwaangashan tahay cinwaankaaga hadda si aad u codayso. Si aad isu diiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax uga beddesho, tag mnvotes.gov

Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha doorashadu ka dhecayso ee deegaankaaga Maalinta Doorashada. Waa in aad tustaa caddayn ah magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Wixii faahfaahin ah, booqo mnvotes.gov ama wac 1-877-600-VOTE.

TAARIIKHADA 2024

DOORASHADA AASAASIGA
Talaada, 13ka Bisha 8aad (August)

MAQNAANSHO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qofahaan imanayd 20ka Bisha 9aad (September) ilaa 4da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isudiwaangeli ugu dambayn 15ka Bisha 10aad (October) si aad waqtii u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA
Talaada, 5da Bisha 11aad (November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE

SIDA LOO CODEEYO

 **VOTE**
2024

...ka timid horay

ARAG TUSAALE AH WARQADDAADA CODBIXINTA

Si aad u aragtid musharixiinta iyo su'aalaha ku qornaan doona warqaddaada codbixinta, booqo mnvotes.gov.

GOOBAHA IYO SAACADAHA CODBIXINTA

Si aad u hesho meesha aad ka codbixinayso, booqo mnvotes.gov. Goobaha codbixinta badankoodu waxay furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo.

WAXA AAD SOO QAADANAYSO

Haddii aad ka diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaaga hadda, uma baahnid in aad la timaadid aqoonsi. Haddii aad u baahan tahay in aad isdiiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax ka beddeshid, waad u baahan doontaa in aad tusto caddayn deganaanshahaaga ah intaadan codayn. Haddii aad rabto in aad ogaato wax intaa ka badan, booqo mnvotes.gov ama wac 1-877-600-VOTE.

HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horayayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 21ka Bisha 9aad (September). Wuxaad kaloo cadsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u cadsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo mnvotes.gov

SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO

Waxaad xaq u leedhay in shaqada lagaa faxaso si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE